



Boeing Access Road Station

Waxyaabaha ku saabsan mashruuca

Mashruuca Sound Transit's Boeing Access Road Station wuxuu ku dari doonaa boostaajo cusub oo 1 Line ah shabakada tareenka ee Link ee u dhow South Boeing Access Road, East Marginal Way, iyo Interstate 5 (I-5) ee Tukwila. Boostaajada waxaa lagu daray Qorshaha Isu-socodka Sound ee 1996 iyo nidaamka cod-bixiyuhu ogolaaday qorshaha Sound Transit 3 (ST3) si loo hormariyo isku xirka iyo helitaanka gobolkayaga.


Faaliidooyinka mashruuca iyo inta uu ka kooban yahay

Ku daritaanka boostaajo cusub Boeing Access Road waxay:

- **Meesha ka saari doonaa 5.5 mayl ee u dhaxaysa Rainier Beach iyo saldhigyada Boulevard International ee Tukwila**, taas oo balaarinays helitaanka gaadiidka mug sare leh ee gudaha gobolka.
- **Ka caawin doona dadka inay tagaan goobaha ay u baahan yihiin inay maalin kasta tagaan**, iyadoo kordhinaysa helitaanka 1 Line iyo shabakada weyn ee tareenka Link.
- **Bixin doontaa ku xiriirinta tareenka Link** iyadoo lagu daray goobo cusub oo baarkin ah iyo sidoo kale wareejinta baska iyo goobaha gaadiidka istaago.
- **Fududayn doonta hormarka mustaqbalka** iyo horumarinta gaadiidka la qorsheeyay ee goobaha mashruuca.

Wax badan ka baro mashruuca oo rukumo iimaylka wargalinta ah:

soundtransit.org/boeing-access-station



Adeega dhakhso iyo joogto ah ee aaditaanka goobaha la aadayo:

- Boeing Access Road ilaa Sea-Tac Airport: 10 daqiiqo
- Boeing Access Road ilaa bartamaha Seattle: 26 daqiiqo



Xaalada mashruuca ee hada: Qorshaynta

Sinaanta iyo u Dhanaanshaha

Sound Transit ahaan, waxaa naga go'an inaan noqono urur ka hortaga cunsuriyiinta oo aan abuurno shuruudaha lagama maarmaanka u ah si loo gaaro sinnaanta isir ahaaneed ee gudaha wakaaladayada iyo bulshada guud ahaan. Waxaan nafteena kula loolamaynaa inaan qorsheyno, dhisno, oo ka shaqayno gaadiidka dadweynaha si loo gaaro guryo, waxbarasho, goobo caafimaad, iyo fursado shaqo, gaar ahaan kuwa ay waxyeelada ugu badan ka soo gaartay cunsuriyadda hay'adaha iyo mida nidaamsan.



Wakhtiga mashruuca

WAXAAN HALKAN U JOOGTA



QORSHAYNTA
2023-2025

KA QEYBOAADASHADA DADIWEYNAHA

NAQSHADAYNTA
2025-2028

KA QEYBOAADASHADA DADIWEYNAHA

DHISITAANKA
2028-2031

KA QEYBOAADASHADA DADIWEYNAHA

ADEEGA
WUXUU
BILAABANAYAA



2031

Ka Qeybgalinta bulshada

Mashruuca hadda wuxuu ku jiraa marxalada taxlillinta ikhtiyaarada, inta lagu guda jiro marka kooxda mashruuca ay qiimeeyaan goobaha suurtagalka ah ee boostaajo iyo waxyaaba la xiriira. Iyada oo ay weheliso tixgalin farsamo, jawaab-celinta bulshadu waxay ku wargelin doontaa aqoonsiga goobta la doorbidayo iyo waxyaabaha la xiriira. Ka qaybgalinta bulshada iyo ka dhiibashada fikrada waxay caawisaa qorshaha Sound Transit iyo qaabaynta nidaam ka tarjumaya baahiyaha iyo rabitaanka bulshadaada. Waxaa jiri doona fursado badan oo looga qeybqaadan karo inta uu socdo mashruuca.

Mashruucyada la xiriira

Boostaajada Boeing Access Road waa mid kamid ah mashaariic badan oo Sound Transit u dhisayo si loo hormariyo isku xirka iyo helitaanka gobolkeenna. Ka baar mashruucyo badan barta soundtransit.org/system-expansion.



Su'aalaha?

La xiriir kooxdayada ka qaybgalinta bulshada:

Tamar Shuhendler, tamar.shuhendler@soundtransit.org, 206-293-9599



Wax badan ka baro mashruuca oo rukumo iimaylka wargalinta ah:

soundtransit.org/boeing-access-station



Turjubaan 800-823-9230

Español 漢語 한국어 日本語

Tagalog русский язык Tiếng Việt

401 S. Jackson St., Seattle, WA 98104 | main@soundtransit.org | soundtransit.org | 888-889-6368/TTY: 711
Si aad ugu codsato macluumaadka qaabab kale wac 800-201-4900/TTY: 711
ama iimayl u dir accessibility@soundtransit.org.

SOUNDTRANSIT